

SOUTHERN

Muhiimadda Dugsiga Sare ee Southern waa isticmaaka habka iskaashiga ee xoog saareysaa waxbarashada, lana xaqiijinaayo in dhammaan ardayda ay muujiyaan xirfadaha qarniga koow iyo labaatanaad si ay diyaar u noqdaan kulliyad –iyo shaqo. Waxaa wadnaha dugsiga sare ee Southern ku yaala aragti ah in la horumariyo ardayda si ay u qalin jabiyaan diyaarna u ahaadaan kulliyad-shaqo. Dugsiga Southern waxay waddada u xaareysaa qorshaha Akaadamiga Luwisfiil iyagoo ka mid ah 11 Dugsi Sare JCPS ee ka qaybgelooyaan furista Dugsiyada Akaadamiga derbi-ka derbi sanad dugsiyeedka 2018-19. Waxaan nahay dugsi arday xoog saaraan, innagoo og in waxbarashada ay dhacdo keliye haddii ardayda dhammaantood ay wax bartaan. Ardayda waxay filanooyiin in fursad la siiyo fursad ay ku gaaraan guul qayb walboo ay doortaan. Waxaa laga yaabaa in ay ka filaan macallimiintooda inay isticmaalaan dadaal iskaashi ah, iyagoo muujiyaa adeeg, caddaalad iyo dhiiranaan si ay u xaqiijiyaan in dhammaan ardayda wax bartaan. Dugsiga Southern waa mid dareen bulsho leh oo korooyaa laguna yaqaano hal-abuur iyo walaac ay u qabaan ardayda oo dhan. Ardayda iyo macallimiinta labaduba waxay helooyiin aqoonsiga shaqadooda heer goboleed iyo dalka oo dhan.


Arrimo Muhiim u ah Ardayda:

- Beel yar oo waxbaranoosaa- Kooxo yar-yar oo arday ah iyo macallimiin soo fidiyaan waaya arag waxbarasho qofeed.
- Afarta Akaadamii ee Southern qabto, waxaa la socda oo la bixiyaa 13 Koorso oo ah Meelaynta Horumarsan (AP).
- Maadooyinka muhiimka- Ingiriis, Xisaab, Saaynis, iyo culuunta bulshada iyo sidoo kale maadooyinka ikhtiyaariga iyo xisadda la talinta ee ardayda oo dhan.
- Dhammaan ardayda Freshmaanka waxaa la siin doonaa xisad la talin ah halkaas oo ay ka helaan fursad ay la kulmaan la taliyaha iyo koox yar oo ka kooban saaxibada fasalka. Sahninta shaqada iyo horumarinta, xisadaan waxaa lagu bartaa xirfadaha muhiimka ah ee guul ka gaarista, sida waxqabad loo bilaabo iyo mas'uuliyad qaadasho, hawl kooxeed iyo wada-xiriirid wax ku ool ah, fikrad wax qiimayn, iyo xallinta dhibaatooyinka. Koorskaan wuxuu ku kaalmayn doonaa in aad sameyso go'aan cilmiyeysan oo la xiriiraa akaadamiga aad ku biiri lahayd sanadka aad gasho heerk 10aad(Sofmoor) ilaa aad ka gaarto sanadka 12aad (Siiniyor). iyo qofka aad rabto in aad noqoto, kulliyada aad jeceshahay, iyo shaqada aad rabto in aad qabato dugsi sare kadib.
- Barnaamijka La talin ilaa jaamacadda luwisfill (UofL)
- Barnaamijka Tababarka Saraakiisha Ciidanka(JROTC)

Akaadamiyaasha iyo waxii laga Takhasuso Fasalka 9aad

Akaadamiga Freshmaan

Fasallada 10-12aad



XAQAA'IQ DEG-DEG ah

Isugeynta Ardayda ku jiraan: 1,372
Cinwaan: 8620 Preston Highway,
Louisville, KY 40219
Lambar Telefoon: (502) 485-8330
SCHOOL LEADERSHIP
Kaaliyaha Kormeeraha Guud:
Paige Hartstern

Member Board: Linda Duncan
Maamulaha: Tyler Shearon
Academy Coach: James McCabe
Barta Interneedka Dugsiga:
<https://schools.jefferson.kyschools.us/High/Southern/>